

Jefferson HS Modernization / Macluumaadka Ugu Danbeeyay ee Mashruuca / Maarso, 2024

Fariintan waxay qayb ka tahay taxanaha caadiga ah ee macluumaadka ugu danbeeyay ee kooxda Mashruuca Jefferson si aad ula socoto inta uu mashruuca Jefferson Modernization marayo wajiga dib u qiimaynta. Waxa aad ka akhrin kartaa macluumaadadii hore ee ugu danbeeyay ka shaqaynayaan sidii ay si faahfaahsan gelin lahaayeen shuruudaha iyo goobta iyo shuruudaha Magaalada ee dhanka waqooyi ee xarunta Jefferson, si loo fahmo sida shuruudahan u saamayn doonaan goobta oo ay u dhisi lahaayeen qorshaha. Maadaama oo dhismaha goob cusub loo wareejin doono oo xarunta ah, kooxdu waa inay eegaan qaabka socodka gaadiidka, xuquuqdaha dhismaha ee jiri kara, jiritaanka dhulka, geedaha jira, habaynta dhismaha, wadada iyo amaanka, iyo waxyaabo kale. Uruurinta macluumaakan waxay qaadataa wakhti laakiin waxay sheegtaa waxa macquulka ah ee ku jira nashqada soo socota.

Febraayo, Kooxda Mashruuca ayaa ka qayb gashay kulanka Dalabka Hore ee Nashqada ee lala galay Gudida Dhulka Taariikhiga ah ee Magaalada. Dalabka Talada Nashqada ayaa ah dalabka ugu sareeya ee hore, talada latalinta ee Gudida Dhulka Taariikhiga ah kahor inta aan loo gudbin Naqdinta Khayraadka Taariikhiga ah. Waxa aanu ka dalbabaday fikirka inay nala wadaagaan dhabada jiri karta ee duminta dhismaha 1909, taas oo wakhti xaadirkan hoos timaada "khayraadka jira" ee Piedmont Conservation District. Gudoomiyayaasha waxay taageereen Kooxda inay dalbadaan in laga dhigo dhismaha 1909 "mid aan waxtar lahayn" marka la eego naqdinta meesha ka saarida khayraadka taariikhiga ah waxa loo yaqaan. 120-maalmo oo dib u dhac duminta ah ayaa ku xigta. Kooxda Mashruuca waxay iminka ka shaqaynaysaa talaabada xigta ee ay dalabkan ku fulin lahayd.

Kooxda Mashruuca ayaa dejinaysay taariikhaha mashruuca ee waawayn ee nashqada, ruqsada, dhismaha, iyo dhamaystirka qorshaha cusub. Fahanka jadwalka ayaa muhiim u ah in la fahmo kharashka mashruuca, maadaama oo kharashku uu kordho mudo kadib. Qandaraaslaha, Anderson Construction, iyo qiyaasaha kharashka ee madax banaan, Rider Levett Bucknall, ayaa

labaduba noo diyaarinaya qiyaasta kharashka dhismaha ee cusub anaka. Jadwalka iyo qiyaasta kharashka mashruuca waxaa loo bixin doonaa oo uu qayb ka noqonayaa bandhiga qorshaha cusub ee Gudida Dugsiga ee Xarumaha iyo Gudida Shaqooyinka ee Maarso 20keeda iyo Gudida Dugsiga dhamaystiran ee Abriil 2deeda.

Kooxda Mashruuca ayaa kala shaqaynaysa kooxda maamulka Jefferson sidii ay u diyaarin lahayd qorshe wada shaqayneed oo nashqada Jefferson ee soo socda ah oo ku xeeran codka ardayga iyo sidoo kale xogta cida dantu kaga jirto ee bulshaqada. Qorshaha wada shaqaynta lagu taliyay waxaa sidoo kale la siin doona Gudida si looga hadlo Abriil.

Wixii xog dheeraad ah ee mashruuca ku saabsan, fadlan booqo [Jefferson Modernization website](#). Hadii aad qabto wax su'aal ah ama faalo ah oo ku saabsan Kooxda Mashruuca fadlan iiimeel u dir JHSBond@pps.net